



XAASHI MURTIYEEDKA U DIYAARSANAANTA MUSIIBADA

SIDA LOOGU DIYAAR GAROORO GUGAC-DABAYLEEDKA

Maaraynta Gurmada iyo Nabadgelyada Dalka ee Degmada Franklin waxay bixisay xogta soo socota oo ku saabsan gugac-dabayleedka – oo ah halis cimilada gu’ga ee Bartamaha Ohio – si adiga iyo qoyskaaguba aad u bedbaadaan

Gudaha:

- Ka fogow daaqadaha.
- Isticmaal toosh haddii ay korantadu tagto. Hayso raadiyaha cimilada oo beteri ku shaqeeya si aad ula socotid warbixinta cimilada.
- Jooji istimaalka telefoonnada taarka leh [landline] iyo qalabka korantadaba. Waxaa fiicnaan karta in aad kombiyuutarrada iyo qalabka kaleba fiilada korantada ka saartid
- Ka dheerow in aad is bilbiso ama qubaysato. Hadday biriqi ku dhacdo gurigaaga waxay maayad koranto ah gurigaaga oo dhan u marin kartaa tuubbooyinka birta ah.

Dibedda:

- Hoos isu dhig. Hadday suuroggal tahay, gabbaad ka hel dhisme.
- Ka fogow geedaha, walxaha dhaadheer, walxaha biraha ah, iyo biyaha.
- Dadka doonta saran iyo kuwa dabbaalaniba waa in ay markiiba dhulka tagaan sida ugu suuroggalsan.

Haddaad Gaari Waddid:

- Dhin xawligaaga.
- Gaariga u bixi cirifka waddada. Hubi in aad ka fog tahay walxaha dhaadheer, sida geedaha, oo ay dabaysha iyo biriqduba soo ridi karaan. Ha xannibin buundooyinka ka hooseeya hayweeyga.
- Shido amarjansiga gaariga oo gaariga ku jir inta ay duufaantu dhaafayso.
- Ha taaban walax bir ah oo gaariga dhex taalla.
- Ka fogow in aad gaari ku kaxayso jidadka ay biyuhu dabooleen.

Maaraynta Gurmada iyo Nabadgelyada Dalka ee Degmada Franklin, oo ah hay’ad dawli ah oo maxalli ah, waxay agaasintaa qorshaynta, tacliiminta, digniinta, waxqabadka iyo ka kabashada gurmada/musiibo ee degmadan oo dhan si ay u yarayso raadreebka xun ee ku iman kara dadka deggan meeshan iyo hantidooda

Waxaa bixiyey deeq 2008 UASI waxaana la cusboonaysiiyey Oktoobar 2010

Xog Bulsho oo Gurmada oo ka Timid: (Emergency Public Information From:)

Franklin County Emergency Management and Homeland Security
5300 Strawberry Farms Blvd., Columbus, Ohio 43230
Phone 614-794-0213, Fax 614-882-3209
Email fcem&hs@franklincountyohio.gov
On the Web at www.franklincountyohio.gov/emahs/